

Caawi dukaamada si'aanu cudurku u fidin!

Maka fogaata dadka kale markaad adeeganayso? Qoyskaaga kula socda ma uga tagtaa dibadda? Haddaad astaamaha cudurka isku aragto maku ekaataa guriga? Hagaag! Waxaad tahay macmiil wanaagsan haddaad saas u dhaqanto.

Dawladdu waxay intaa ku hawlantahay iney hesho goobaha cudurku ku fidayo, kadibna waxay ku soo rogtaa sharciiyo goobahaas, si loo xakameeyo fidida cudurka, tusaale ahaan sharciiyada cusub ee xakamaynta cudurka waxaa ka mid ah, sharciiyada goobaha ganacsiga.

Dhammaan dukaanlayda waxaa laga rabaa iney dukaamadooda ka dhigaan meel shaqaalaha dukaanka iyo macaamiisha adeega u yimaada nabad uga ah qaadida cudurka. Sidoo kale macaamiishana waxaa la rabaa iney mas'uuliyadooda ka qaataan ka hortagga fidida cudurka.

Talooyin: Sidan baad mas'uuliyadaada dukaamada u qaadan kartaa.

- Ha soo adeegan haddaad calaamadaha cudurka covid-19 (karoone) qabto.
- Soo adeego marka ay dadku ku yaryihiin dukaamada.
- Keligaa soo adeego (koox haku gelina dukaamada)
- Dibadda/banaanka ku sug haddey shaqaalaha kuu sheegaan in dukaanku cirirri yahay.

- Raac sharciiyada dukaanka
- Ha cirri rinin dadka –una jirso ilaa 2 mitir qofka kale.
- Ka fogow haddii qof kugu soo dhowaado.
- Isticmaal daawada gacmaha ama saabuun isaga dhaq.

Waa sharciiyo adag marka hay'adda caafimaadka gobolka kontoroolayaan dukaamada.

Sharciga cusub ee bilowday 10-kii jannaayo waxaa ku qoran in dukaamada raacaan sharciga u degsan.

Si loo hubsado in sharciga loo hogaansamey, waxay dawladdu amar ku siisay hay'adda caafimaadka ee gobolka iney kormeeraan dukaamada.

Gobolka Kalmar waxaa hawshaas mas'uul ka ah Åsa Axheden.

”Waxaan kormeeri doonaa dukaamo badan si'aan u aragno in sharciga loo hogaansanyahay. Waxaan siin doonaa talooyin ah sideey sharciga u raaci lahaayeen. Haddii aan aragno inaaney sixin wixii khalad ah ee jira markaan dib ugu soo laabano, waxay mutaysanayaan ganaax” ayey tiri.

”Waa muhiim in macaamiishuna u fudu deeyaan in dukaamadu sharciga raacaan”

Dukaamadoo idil sidan baa laga doonayaa

- Cabira oo xisaaba inta macaamiil ee markeliya dukaanka soo geli karta (qofkiiba 10 mitir oo isku wareeg ah, waa marka laga saaro iskifaalayaasha dukaanka iyo alaabada kale ee dukaanka)



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa. Qoraalkan warbixinta ah waxaa soo diyaariyey, hay'adda xaaladaha degdegga ah ee gobolka. Hay'adda xaaladda deg degga ah ee gobolka Kalmar waa wada shaqeyn ka dhaxaysa dhammaan degmooyinka gobolka, gobolka, hay'adda caafimaadka ee gobolka iyo mas'uuliyiin kale oo gobolka ah. Markay xaalad deg deg ahi ka dhex dhacdo bulshada, si wada jir ah baynu isu caawinnaa.



facebook.com/krissamverkan.kalmar



VÄSTERVIKS
KOMMUN

- Ku dhajiya boodh albaabka hore oo ay ku qorantahay inta qof ee markeliya dukaanka ku jiri karta.
- Waa inaad hubisaan inaan inka badan intaas soo gelin.
- Waa inaad hubisaan in aan lays ciriiriyin marka albaabka laga baxayo.
- Waa in aay taalaa dukaanka daawada gacmaha lagu dhaqdo.
- Waa inaad hubisaan in sharciga la raacayo.
- Wargaliya macaamiisha sida lagu yareen karayo isqaadsiinta cudurka.
- Waa inaad aqoon u leedihiin sharciyada cudurka covid-19 (karoona)
- Qora wax walba oo aad sameyseen

Sharciga cusub...

Sharcigan cusub waxaa la yiraa "Lag (2021:4 ahna sharciga xakameynta cudurka covid-19)"

Halkaas bay ku qorantahay sida loo xakameynayo fidida cudurka.

Si sharciga loo raaco loona fahmo waxaa loo qoray si faah faahsan oo hordhac qoraal oo cadna leh.

Hordhaca dukaamada quseeya waxaa la yiraa HSLF-FS 2021-2.

Dheeraad: Waxaan tabaynaa talaalkii...

Mar dhaw waxaa bilaabanaya talaalka cudurka covid-19 (karoona) dadka da'doodu ka sareyso 70 sanno.

Waxaa u imanaysa warqad daka dhashay sanadkii 1951-kii iyo wixii ka horeeyey. Warqadaas oo ay ku qorantahay sidey isu talaali lahaayeen.

Wuxuu qofku ballan ka samaysan karaa 1177.se amaba wici karaa xaruntiisa caafimaadka.

Qofka markii talaalka hore lagu dhufto, waxaa isla markiiba la siinaya waqtiga talaalka labaad.

Mar walba waa lacag la'aan talaalka covid-19!



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa.
Qoraalkan warbixinta ah waxaa soo diyaariyey, hay'adda xaaladaha degdegga ah ee gobolka. Hay'adda xaaladda deg degga ah ee gobolka Kalmar waa wada shaqeyn ka dhaxaysa dhammaan degmooyinka gobolka, gobolka, hay'adda caafimaadka ee gobolka iyo mas'uuliyiin kale oo gobolka ah. Markay xaalad deg deg ahi ka dhex dhacdo bulshada, si wada jir ah baynu isu caawinnaa.



facebook.com/krissamverkan.kalmar



VÄSTERVIKS
KOMMUN